Qabyo qoraal dib loo saxay 9-21-2020

Miisaaniyada qabyada ah ee King County Metro waxay ilaalinaysaa isku socodka gobalka, waxayna doonaysaa in hormar la sameeyo mustaqbalka

Madaxa fulinta ee King County Dow Constantine ayaa u gudbisay miisaaniyada labada sano ee Metro Dawlada Hoose ee King County markay taariikhdu ahayd Sibteembar 22, ayadoo la bilaabaayo shaqada rasmiga ah ee khadka gaadiidka dadwaynaha ee ugu wayn gobalka.

Miisaaniyadu waxay tilmaamaysaa dadaalka socda ee lagu siinaayo adeegyada basas la heli karo, water tax (tagaasida biyaha), Acess Paratransit (Helitaanka socod dhaweeyaasha), iyo vanpool (Gaadiidka hoomeeyda) - gaar ahaana si adeeg loo siiyo rakaabyada baahida ugu wayn qaba.

Waxay muujinaysaa sida Metro ay u doonayso inay siiwado inay ka jawaabto ayna wax ka qabato caqabadaha joogtada ah ee meelaha miisaaniyada la filaayo inay ka hoos dhacdo intii la rabay iyo meelaha rakaabku yaraan doono aafada COVID-19 awgeed.

Miisaaniyada ayaa sidoo kale ka caawinaysa Metro inay diyaar noqoto marka rakaabka iyo dakhligu soo kobcaan si loo sii wado kobaca khadka socdaalka oo shaqo badan.

Adeegyada wax laga badelay ayaa muhiim ah sanadaha 2021 iyo 2022 anagoo la tacaalayna xaqiiqooyin dhaqaale oo adag. Hase yeeshee, waxaan diirada saaraynaa siinta adeegga baska macaamiisheena, anagoo hadda samayna 11,000 oo socdaallada baska ah maalin kasta dhammaan daafaha King County. Waxaan sidoo kale diirada saaraynaa bixinta adeegga maalinta oo dhan ah ayadoo haddana dalabka badan ee gaadiidka si ku meel gaar ah u joogsaday aafada cudurka awgeed.

Guud ahaan, muhiimadaheena guud ayaa muujinaaya dadaalkeena ku aadan badqabka, sinaanta, iyo joogtaynta shaqooyinkeena maalin kasta ayadoo gobalku cudurka la tacaalaayo kana soo kabanaayo.

Metro waxay ka shaqaynaysaa inay soo celiso ayna dib u dhisto adeegga socdaalka, ayna yarayso wasakhda sunta ee gobalkeena, ayna yarayso socdaallada halka rakaab ah. Waxaana sidoo kale dib uga fiirsanaynaa xeer samaynteena iyo aruurinta lacagta basaska, waxaana sii wadaynaa shaqada joogtada ah ee kor u qaadista hanaanka lacag qaadista cadaalada ah.

Inta lagu jiro dhawrka sano ee soo socda, waxaa jiro qodobo kala duwan oo ay tahay in la ogaado.

Dhisida iyo bixinta adeegyada sanadaha 2021-22

- Waxaan sii wadnaa inaan hormar ka samayno fulinada marinka RapidRide H Line (kan maanta ee Route 120 oo u dhaxeeya Burien, White Center, Delridge, iyo bartamaha Seattle) RapidRide G Line oo ku yaala Seattle, iyo marinka mustaqbalka ee RapidRide I Line (oo u dhaxeeya Renton, Kent, iyo Auburn.)
- Waxaan sii wadnaa inaan maal gelino gaadiidka 100% ka caagan wasakheynta hawada iyo inaan diyaarino helitaanka wareegeena koobaad ee basas cusub oo koronto ku shaqeeya 40 ah baytarigooduna yahay mid xawaare dheereeya iyo nidaamka jaajgaynta oo gaariyaashu wataan.
- Waxaan diidaynaa fikradaha dib u dhisida adeegga baska oo laga samaynaayo waqooyiga King County si ay iskugu xiraan saddexda xarumood ee la qorshaynaayo ee tareenka Link light rail sanadka 2021, kana shaqayn doona U District, Roosevelt, iyo Northgate oo ku yaala Seattle.

- Waxaan adeegga kusoo celin doonaa meelaha ugu baahida badan, anagoo akhli u qoondaynayna wadooyinka aadka rakaabkuu joogo/dadku ku badan yihiin, gaar ahaana kuwa u adeegga danyarta iyo dadka Black, Indigenous, and people of color (BIPOC) communities (BIPOC, Madoowga, Asalka, iyo bunshooyinka dadyoowga aan cadaanka ahayn).
- Waxaan sidoo kale taageeraynaa soo kabashada dhaqaalaha ee gobalka anagoo wax ka badalayna adeegga ayadoo shirkaduhu soo celinayaan shaqooyinka dadka gaadiidkeena raacana soo badanayaan.

Dib u qaabaynta xeer samaynta iyo badqabka, qaab dhismeedka lacagta basaska lagu raaco

- Siduu shaaciyay Madaxa fulinta Constantine, Metro waxay kala shaqayn doontaa xafiiska Booliiska ee King County, qandaraaslayaasha, shaqaalaha, iyo xubnaha bulshada sidii ay iskula abuuri lahaayeen qaabab cusub oo lagu badelo qaabkii horay loogu qaadi jiray lacagta basaska, taasoo saamayn xun oo qaldan ku reebtay dadka basaska raaca ee aan cadaanka ahayn. Ayadoo uu jiro cudurka COVID-19, qaadista lacagta baska ayaan wali la bilaabi doonin ugu yaraan ilaa dhammaadka 2020. Yoolku waa in la abuuro barnaamijyo cusub sanadka 2021 lana dhaqan gasho ugu danbayn 2022.
- Metro waxay dib u dhigaysaa kordhinta la qorsheeyay ee lacagta basaska si ay waqti u siiso soo kabashada dhaqaalaha si uu usoo xoogaysto kadibna dib loo eego lacagaha basaska ee noocyada kaladuwan—ayna ku jiraan baska, water taxi, adeegga paratransit, iyo kuwo kale.

Qorshayaasha mudada dheer ee lagu hormarinaayo waxna looga badelaayo adeegga

Ayadoo balaarinta adeegyada Sound Transit Link light rail heer gobal ay socdaan mashruucyada degdega ah ee gaadiidkuna sii socdaan, Metro waxay u diyaar garoobaysaa inay kala shaqayso macaamiisha iyo saamileeyda qorshaynta muhiimka ah iyo shaqada iskaashiga ah inta lagu jiro dhawrka sano ee soo socda. Dadaallada waxaa sal u ahaan doona shaqada horay loogu guulaystay si la iskugu dhafo mashruucyada baska, tareenka, iyo isku socodka degdega ah si looga faa'iidaysto abuurista isku socod macaamiishu isku halayn karaan.

Balaarinnada aasaaska: Aafada iyo amarka guri joogista ayaa si wayn u yareeyay dalabka adeegga, iyo sidoo kale rajooyinka la qabay.

- Metro waxay sii wadaysaa shaqadeena balaarinta South Campus oo ku yaala Tukwila, ayna ku jirto naqshadaynta iyo dhisida South Annex Base marka la gaaro 2027. Metro waxay naqshadayn doontaa xarumahaan cusub si ay door uga qaadato fayaqabka bii'ada iyo muuqaalka ee deegaannada ku xeeran ayadoo yoolka fog yahay adeegsiga gaadiid koronto ku shaqeeya. Xarumaha South Campus ee dhammaan korontada ku shaqeeya ayaa gacan ka gaysan doona yaraynta wasakhda iyo qaylada ka dhasha shaqooyinka saldhiga basaska. Waxaan ku dadaalaynaa yoolalkaan bii'ada iyo bulshada kuwaasoo waafaqsan mabaadii'deena sinaanta iyo joogtaynta shaqada.
- Metro waxay hakisay dadaalo ay ku doonaysay inay ku hesho goob ay ka dhisto saldhig cusub oo ku yaala koonfurta King County. Metro waxay qorshaynaysaa inay kala badesho dookhyada ee xiliyadaan xaalku adag yahay, iyo—ayadoo dalabaadku soo laabanayaan— waxaan ka fakari doonaa inaan dib uga shaqaysiino shaqada iibsashada saldhiga koonfurta King County.

Isbadelada RapidRide: Sabab la xariirta ilaha dhaqaalaha oo la yareeyay, Metro waxay rajaynaynaa in la yareeyo cabirka balaarinta horay loo qorsheeyay ee barnaamijka RapidRide oo lagasoo yareeyo todobo layn sanadka 2027 lagana dhigo saddex layn sanadka 2027. Hoos u dhigistaan la filaayo

waxaa soo gudbisay Metro's Mobility Framework (Naqshada Khadka Isku socodka Metro); Service Guidelines (Tilmaamaha Adeegga); iyo xaalada mashruuc kasta, khatarta, qarashaadka shaqada, iyo qarashaadka bud dhiga shaqada. Go'aanka kama danbaysta ah wali waxaa laga sugayaa ansixinta Miisaaniyada ee Dawlada Hoose ee King County bisha Nufeembar.

- Hadda kadib, labadaba mashruucyada marinnada RapidRide G Line (Madison Valley – Bartamaha Seattle) iyo H Line (Bartamaha Seattle – Burien) dhawaan ayaa dhismahooda la galayaa waxayna awoodi doonaan inay dhaqan galaan sida ugu dhakhsaha badan. Marinnadaan oo ku jiray mashruucyadooda gaarka ah ayaa ka dhashay inay yihiin muhiimada waawayn ee wakaalada ee labadaba Metro iyo Seattle Department of Transportation (SDOT, Waaxda Gaadiidka ee Seattle) muddo dheer. Ayadoon tani jirto, labadaba marinnada G iyo H Line ayaa ku jira miisaaniyada qabyada ah ee 2021-2022.
- Marinnada RapidRide I (Renton – Kent – Auburn), J (Bartamaha Seattle – Roosevelt), K (Totem Lake – Eastgate), and R (Bartamaha Seattle – Mount Baker – Rainier Valley) dhammaantood waxay matalaan mashruucyo qaas ah iyo adeegyada isku socodka. Waxay ahaayeen muhiimadaha wakaalada lagasoo bilaabo markii barnaamijka balaarinta RapidRide la aasaasay si ay u matalaan marinnada ugu adag ee mustaqbalka halbawlaha noqon doona. Shaqada I Line ayaa sidii la qorsheeyay loo fulin doonaa ayadoo Metro taageerayso dadaalka SDOT ee ku aadan J Line. Shaqada Metro ka waday marinnada K iyo R Line ayaa la joojin doonaa.

Bilaha soo socda, Dawlada Hoose ee King County ayaa ka fiirsan doona una codayn doona "Executive Proposed 2021-22 Budget ("Miisaaniyada waaxda Fulintu soo gudbisay ee 2021-22.") Metro waxay ka warbixin doontaa go'aannadaas kama danbaysta ah markay soo baxaan. Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan shaqada miisaaniyada ayna ku jiraan fursadaha u furan fikradaha dadwaynaha, booqo wetseetka Dawlada Hoose ee King County "2021-22 Biennial Budget" webpage (Miisaaniyada labada Sanadood ee 2021-22").

Waxaan ka mahadnaqaynaa kalsoonida joogtada ah ee dadka gaadiidka raaca ku qabaan Metro ee baahiyahooda socdaal ee maalin kasta, iyo tallaabooyinka aan qaadayno si aan u bixino marinka socdaalka oo amaan ah, la isku halayn karo, loona siman yahay.

Shaqada Dawlada hoose iyo Waqtiyada Kulanka

Ka baaraan degista dawlada hoose ayaa dhammaan doonta bartamaha Nufeembar ayadoo la dhaqan gelinaayo miisaaniyada 2021-22. Dadwaynaha waxaa lagu boorinayaa inay ka qaybgalaan shaqada ayagoo fikir ka dhiibanaaya qaybaha kaladuwan ee miisaaniyada. Dawlada hoose ayaa soo gelinaysa boggaan xog dheeraad ah inta lagu jiro shaqada miisaaniyada. Sabab la xariirta aafada COVID-19, shaqada miisaaniyada Dawlada hoose ayaa lagu qaban doonaa oonleen ahaan.

Haddii aad doonayso wada sheekaysiga ku aadan miisaaniyada socdaalka, Metro waxay qayb ka ahaan doontaa Kulanka Dawlada hoose ee Gobalka oo la qaban doono **Oktoobar 15, 2020 inta u dhaxaysa 9:30subaxnimo – galabkii**. Waxaad kulanka oo layf ah ka fiirin kartaa oonleenka halkaan ama ka daawo King County TV Channel 22 (Comcast Channel 22 iyo 322(HD), Wave Broadband Channel 22).

Qabyo qoraal dib loo saxay 9-21-2020

Dadwaynuhu waxay fursad u heli doonaan inay fikir dhiibtaan inta lagu jiro kullanada soo socda ee Dawlada hoose:

- Sibteembar 30 (Arbacada) 9:30subaxnimo – 12:00duhurnimo
- Oktoobar 22 (Khamiista) 6:00galabnimo – 8:00habeenimo
- Nufeembar 12 (Khamiista) 9:30subaxnimo – 12:00galabnimo
- Nufeembar 17 (Talaadada) 11subaxnimo – 12:30galabnimo – tani waa maalinta ugu danbaysa ee doodaha miisaaniyada.
-

Ogoow: Kulanada ayaa sii socon kara wax ka badan mudada la qorsheeyay inay dhammaadaan. Ajandayaasha kulanka ayaa laga heli karaa halkaan waxyaabaha kulankana waxaa laga heli karaa halkaan.

Sida loo baxsho Fikrad Dadwayne

Waxaad bixin kartaa fikrada hadalka ah ee dadwaynaha inta lagu jiro kulanka lagaamana doonaayo inaad xili hore is qorto.

Nambarka Taleefanka: 1 253-215-8782

Aqoonsiga kulanku waa 995 4088 8432; baasweerku waa 091270.

(Haddii aadan doonayn in laguusoo waco kulanka fikrad dhiibashada, fadlan ka fiiri oonleenka ama TV ga halkii aad taleefanka ka adeegsan lahayd.)

Turjumaada

Si aad xog badan uga hesho miisaaniyada qabyada ah, guji halkaan. Waxaad halkaas ka helaysaa xogta miisaaniyada oo ku qoran luuqado badan.

Fasiraada

Haddii aad doonayso inaad fikir dhiibato inta fikradaha dadwaynuhu socdaan aadna doonayso qof wax kuu turjuma, fadlan la xariir Reeni Nair ugu yaraan 48 gudahood kahor kulanka.

Ashreeni (Reeni) Nair

Dawlada Hoose ee King County, Iskuduwaha Sinaanta iyo Cadaalada Bulshada

206-477-4978

Reeni.Nair@kingcounty.gov

Baahiyaha Americans with Disabilities Act (ADA, Dadka Ameerikaanka ah ee Naafada ah)

Kulanka ayaa faahfaahin qoraal muuqaal ah lagusoo xiri doonaa. Haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah si aad u hesho kulanka ama aad doonayso inaad fikir qoraal ah dhiibato, fadlan la xariir xafiiska Karaaniga oo ah clerk@kingcounty.gov.